

SHAQO BARASHO FAQS

WAA MAXAY SHAQO BARASHO?

Shaqo Barashadu waa qaab lagu tababarayo adiga oo gunno shaqeysanaya. Waxaad lagu siinayaa casharro fasal ah oo tababarka shaqo ah, si kor loogu qaado aqoon gaar kuu ah oo aad ku shaqeysan karto.

Tababarteyaasha waxay kasbadaan mushahar markay tababbarayaan howshana loo qaabeeyey si loogu oggolaado isu-dheellitirnaan caafimaad iyo nolol-shaqo. Dhamaadka shaqada tababarka waxaad heli doontaa xirfadaha iyo tababarka looga baahan yahay warshadaha baahida sare leh.

MAXAY YIHIIN FAA'IIDOOYINKA SHAQO BARASHADA?

Tababarte ahaan, waxaad shaqaysan doontaa nolol fiican inta aad baranayso xirfadaha aadka loogu baahan yahay. Waxaad si firfircoon u shaqeysaa oo aad kasbataa dakhli maalinta kowaad sida aad ugu tababbarto shaqadaada loo-shaqeeyahaaga. Mushaharkaagu wuu sii kordhayaa inta uu socdo tababarkaaga. Markaad dhameysid tababarkaaga shaqo, waxaad kasbatay aqoonsi qaran ahaan laga aqoonsan yahay xirfad aad u sarreysa, shaqo aad u baahan.

ILAA IMISA AYAA UU SOCONAYAA TABABAR SHAQADU?

Dhererka heshiiska shaqo waxay ku xiran tahay shaqooyinka iyo warshadaha. Dhererka wuxuu ku saleysan yahay waqtiga loo baahan yahay si loo barto dhammaan dhinacyada shaqada ama ganacsiga, intaa waxaa dheer, dhameystirka fasalka lagama maarmaanka u ah iyo tilmaamaha loo baahan yahay.

MA HELI KARAA IN AAN SHAQEYSTO SAACADIIBA GUNNO IYO IN AAN HELO WAXBARASHO LACAG AAN DHIIBAYO?

Tababarte ahaan, waxaad qaadanaysaa mushahar saacadle ah laga soo bilaabo maalinka aad aad bilaabato. Caadi ahaan, magdhowga ayaa kuu kordhayaa intaad baranayso xirfadaha shaqooyinka gaarka ah iyo tan dhammaystirka koorsada fasalka.

YAA BIXIYA TABABARRADA SHAQO?

Waxaad dooran kartaa in ka badan 1,000 shaqo ah, waxa shaqooyinkaaas ka mid ah tababarrada dhismaha, wax soo saarka, Beeraha, daryeelka caafimaadka, IT-ga, gaadiidka iyo farsamada. Shaqo bixiyeyaasha dhammaan ilahani waxa ay doonayaan shaqaale xirfadoodu sareyso si ay shirkadahaani u noqdaan kuwo tartankooda ku guuleysta, waxaana ay baadi goobayaan in ay maalgashtaan qof adigoo kale ah.

SHAHAADOOYIN NOOCEE AH AYAA LOO BAAHAN YAHAY SI AAN UGA QEYB GALO TABABARRADA?

Guud ahaan, waxaad u baahantahay shahaadada dugsiga sare ama G.E.D. si aad u noqoto codsade shaqo-barasho. Xisaabta, sayniska iyo koorsooyinka warshadaha ama farsamada ayaa si gaar ah waxtar ugu leh doorkaaga shaqo-barasho.

HADDII AAN HOREY U SOO DHIGTAY WAXBARASHADA KOLLEEJKA AMA AAN HORE UGA SOO SHAQEYAY MEHERAD KALE, MA BUUXIN KARAA SHURUUDAHA INAN KA QEYBGALO TABABARKA?

Haa, qof kasta oo deggan Minnesota oo ka weyn 18 sano oo haysta shahaaddo dugsiga sare ama G.E.D. wuxuu xaq u leeyahay tababar shaqo. Waxbarashada hore ama shahaadooyinka waa la soo dhaweynayaa, laakiin looma baahna.

SIDEE XOG HOR LEH KU OGAAN KARAA?

Wakiilka Tababbarka Minnesota ayaa diyaar u ah inuu ka jawaabo su'aalaha isla markaana kuu jiheeyo barnaamijyada tababarka ee Minnesota.

Email: dli.apprenticeship@state.mn.us

Soo Wac: 651-284-5090 or 1-800-342-5354

Booqo: ApprenticeshipMN.com

SHAQEYSO. BARO. SHAQO-BARASHO AYAA WAX TARTA

APPRENTICESHIPMN.COM [f](#) [@](#) [in](#)